Ismaamulku wuxuu Meelmariyay Miisaaniyad $7.36 bilyan ah

Guddiga Korjoogeyaasha Ismaamulka San Diego wuxuu si aqlabiyad leh u ansixiyay $7.36 bilyan oo ah miisaaniyadda 2022-23 maaalinta Talaadadii.

Miisaaniyadda cusub waxay samaynaysa dadaalo wax looga qabanayo caafimaadka dhimirka, hoy la'aanta, sinaanta, caddaaladda bulshada iyo isbadalka cimilada, ayada oo sii xajinaysa badqabka bulshada ee aasaasiga ah, isticmaalka dhulka iyo adeegyada bulshada.

Madaxa Guddiga Nathan Fletcher wuxuu dadweynaha uga mahad celiyay ka qaybqaadasha jawaab celintoodii iyo ka qaybgalka kulamo iyo dhegaysiyo fara badan oo miisaaniyadda ku saabsan. Ayada oo la soo xiganayo halkudhigga Ismaamulka ee ah, "dhiirigalinta ugu wanaagsan waa tan dadweynaha," Gletcher wuxuu sheegay in Guddigu aqoonsaday kaalintiisa aasaasiga ah ee ku saabsan in bulshada laga dhigo mid ka ammaan hesha danbiyada iyo xaaladaha degdegga ah sida dabka kaymaha ka kaca, laakiin in sidoo kale Ismaamulku samaynayay maalgashiyo waaweyn oo ku saabsan adeegyada aasaasiga ah.

"Waxaan rumaysanahay in miisaaniyad sanadeedkeena 2022-23 uu ka tarjumayo qiimeyaasha," Fletcher ayaa sidaa yiri. "Ugu danbeynta, waa sidaa waxa miisaaniyaddu tahay. Ma ahan baakatyo lacag ah. Waa wax muujinaya qiimeyaal iyo muhiimad siinta iyo aqoonsashada baahiyaha bulshada ka dhex jira."

Miisaaniyadda $7.36 bilyanka ah ee uu Guddigu meelmariyay Talaadadii waxay $208 milyan ka badan tahay soojeedintii miisaaniyadda ee la sameeyay bishii Maajo. Ayada oo 1.8%, ka badan miisaaniyaddii Ismaamulka ee 2021-22.

Qaar kamid ah waxyaabaha kusoo kordhay miisaaniyaddii lasoo jeediyay kuwaas oo kordhiyay qorshaha kharashgaraynta ee kama danbaysta ah waxaa kamid ah lacag lagu daray kharashaadka shaqaalaha ayadoo lagu salaynayo gorgortano; lix mashruuc oo ku saabsan hormarinta magaalada; si loo iibiyo dayuurad kuwa qumaatiga u kaca ah oo dabdamiska loogu talagalay taasoo laba matoor leh; iyo barnaamij la bilaabayo oo loogu talagalay in lagu xoojiyo, lagu

adkeeyo looguna sameeyo difaac guryaha khatarta badan ugu jira dabka. Waxaa sidoo kale jirta lacag loogu tala galay gawaarida cusub iyo shaqaale dheeraad ah oo loogu tala galay hay'adaha sharciga.

Miisaaniyadda ugu danbaysa ee la meelmariyay waxay maalgalin ka samaynaysaa dhowr qayblood oo muhiim ah.

Kaalmada Caafimaadka Dhimirka iyo Isticmaalka Maandooriyaha

Miisaaniyadda cusub waxay soo kordhinaysaa $81.9 milyan iyo 115 boos oo cusub si ay gacan uga gaysato sii wadidda dadaalada Ismaamulku ku badalayo hanaankiisa caafimaadka ee soo jireenka ahaa, ayadoo laga badalayo ka jawaabidda qalalaasaha loona badalayo kahortagid, daryeel socda si dadka looga dhigo kuwo isku xiran oo caafimaad qaba.

Miisaaniyaddu waxay sii wadaysaa hormarinta adeegyada si dadka looga caawiyo caqabadaha caafimaadka dhimirka iyo dhibaatooyinka ka yimaada isticmaalka maandooriyaha, ayada oo diiradda la saarayo dadka horaan si aan la ogayn ula dhibtooday, oo ay kamid yihiin dadka wajahaya hoy la'aanta iyo dhalinyarada.

Miisaaniyaddu waxay taageeraysaa Kooxaha Ka jawaabista Qalalaasaha Ismaamulka ee Guurguura kuwaas oo ah khubaro qaabilsan caafimaadka dhimirka badalkii hay'adaha sharcigu ka jawaabi lahaayeen dadka qalalaasaha kujira marka ay ku haboontahay.

Miisaaniyaddu waxaa sidoo kale kamid ah ilo fara badan si nooca adeegga saxda ah loogu hagaajiyo qofka u baahan — daryeelka dib u xoojinta, adeegyada dugsiga ku saabsan, adeegyada loogu tala galay dhalinyarada la koriyo, dadka kujira adeegyada daryeelka muddada dheer iyo bulshada LGBTQ.

Hoy la'aanta iyo Guriyaynta

Si loo sii wado dadaalada hormar wax ku ool ahna looga sameeyo ciribtirka hoy la'aanta, miisaaniyadda waxaa kujira caafimaadka dhimirka iyo kaalmada isticmaalka maandooriyaha ayada oo la maalgalinayo guriyaynta.

Maalgalinta la kordhiyay waxaa kamid ah $11.9 milyan oo laga keenayo sanduukha kobcinta oo halmar ah kaasoo loogu tala galay guriyaynta jaban si loo yareeyo hoy la'aanta.

Ayada oo qayb ka ah miisaaniyadda cusub, Maarso, Korjoogeyaasha Ismaamulku waxay ansixiyeen samaynta $10 milyan oo dheeraad ah taaso u diyaarsan in magaalooyinku ku iibsadaan guryo iyo goobo si ay u joogaan dadyowga wajahaya hoy la'aanta. Mid kamid ah iskaashiyadiii ugu danbeeyay oo lala sameeyay Lucky Duck Foundation iyo Magaalada San Diego waxay keeni doontaa hoy 150 sariirood ah oo logu talagalay xaaladaha degdega ah oo xagaagaan la furayo.

$3 milyan oo kale ayaa loo isticmaali doonaa si loogu abuuro guriyayn jaban oo dheeraad ah taasoo loogu talagalay dadka deegaanka ayada oo laga dhaafayo kharashaadka ogolaanshaha si loo dhiirigalliyo dhisidda qaybaha guryaha ee muhiimka ah. Intaa waxaa dheer, $810,000 ayaa lagu kharash garayn doonaa in lagu abuuro sharci kala xadayn dhammaystiran kaasoo shirkadaha cusub ee dhismaha guryaha shardi uga dhigaya ku daraan guriyaynta dadka kujira ama ka hooseeya heerarka dakhliga dhexe ay awoodaan.

Dib u hanaynta Cadaaladda

Miisaaniyadda cusub waxay sii wadaysaa in barnaamijyada Ismaamulku u wareejiyo hanaankiisa cadaaladda kahortagid, dhaqan celin iyo tababar si dadka looga caawiyo inay iska ilaaliyaan ku luglahaanshaha cadaaladda si guul lehna bulshadooda ugu soo laabtaan marka la hayo kaddib. Arinkaan waxaa kamid ah hindisaha Badalka Xarigga. Hindisuhu wuxuu taageerayaa waxa badalka u noqon kara xabsiga wuxuuna bixinayaa adeegyo iyo daryeel, ay kamid yihiin caafimaadka dhimirka iyo adeegyada ku dhexdaridda bulshada, ee dadka aan khattarta ku keenayn dadweynaha.

In ka badan $140 milyan ayaa lagu maalgeliyay adeegyada daryeelka caafimaadka ee xabsiyada Ismaamulka si danbiileyaasha loo caawiyo.

Qiyaastii $6.2 milyan ayaa loo diri doonaa Machadka Hormarinta Dhalinyarada (Youth Development Academy) si loo caawiyo dadka da' yarta ah ee

galay danbiyada culus ayada oo la siinayo niyad dhis dheeraad ah, caafimaadka habdhaqanka ee muddada dheer, adeegyo xirfad dhisid iyo dhaqan celin iskugu jira si looga caawiyo in ay bulsahada kusoo noqdaan.

Xabsi ka cafinta Ismaamulku wuxuu isticmaali doona $1 milyan oo ku socota tababarka xasilinoonta xiliga shaqada ee loogu tala galay shaqaalaheeda, ayaka oo taageeraya dadka da’ yarta ah ee ay korjoogtaynayaan.

Barnaamijka Juvenile Diversion Initiative iyo Transitional Age Youth Diversion ee xafiiska Garyaqaanka Degmada waxaa lagu howlgalin doonaa $2.4 milyan, si uu dadka aan qaangaarin u siiyo fursad ay ku aqbalaan adeegyada iyo la talinta badalkii la maxkamadayn lahaa.

Xafiiska Difaaca dadweynaha waxay kusoo dari doonaan $21.8 iyo 90 shaqaale ah si ay u difaacaan macaamiisha, u matalaan soogaloootida faqriga xaafadaheena kajira, sarena loogu qaadayo kala guurka kusoo noqoshada bulshada.

Garyaqaanka Degmadu wuxuu isticmaali doonaa $3.5 milyan waxayna kusoo daraysaa 18 boos si loo balaariyo adeegga la siinayo dhibaneyaasha danbiga, oo ay kamid yihiin South Bay Center for Community Resiliency iyo Trauma Recovery, barnaamij mar labaad la xukumayo.

Sinaanta iyo Helitaanka

Miisaaniyadda cusub waxay sidoo kale sii wadaysaa dadaalada lagu xoojinayo sinnaanta dhammaan barnaamijyada Ismaamulka iyo adeegyada.

Xaafiiska Ismaamulka ee Sinaanta iyo Cadaaladda Bulshada wuxuu meelmariyay Nidaamkiisa Qiimaynta Sinaanta Miisaaniyadda ee cusub taasoo waaxyaha Ismaamulku muhiimad ku siinayo adeegyada iyo qoondooyinka ayada oo sinaanta lagu xisaabtamayo. Nidaamku wuxuu isticmaalayaa su’aalo is xigxiga sidii si wanaagsan loogu fahmi lahaa sida qoondooyinku u saameeyaan bulshooyinka taariikhiyan loo gacan bidixeeyo nugulna, kuwaas oo dakhligoodu hooseeyo ama kuwa taariikhiyan iyo haddaba la dhibtoonaya sinaan la’aanta.

Nidaamku wuxuu sidoo kale la shaqaynayaa ka qaybgalka bulshada, qayb muhiim ah oo ka mid ah howlaha Ismaamulka kaasoo lagu balaarin doono

miisaaniyaddaan si fursado loo siiyo dhammaan xubnaha bulshada si ay kaalimo wax ku ool ah uga cayaaraan wadaxaajoodyada iyo go'aan qaadashada.

Kordhinta adeegyada tarjumaadda iyo fasiraadda waxay helitaan balaaran siin doontaa adeegyada iyo macluumaadka.

Xaafiis cusub oo loogu talagalay Waaritaanka iyo Caddaaladda Deegaanka waxaa lagu maalgaliyay $3.5 milyan iyo shaqo si loo xaqiijiyo in dhammaan bulshooyinku ay difaac iskumid ah oo ka dhan ah khataraha caafimaadka haystaan.

San Diego County Office of Labor Standards iyo Enforcement wuxuu noqon doonaa goobta xarunta u ah waxbarashada iyo ilaha loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalahooda. Wuxuu samayn doonaa cilmibaarista iyo taxliilinta cilmibaarista ee khusaysa arimaha shaqaalaha loona sii wado talaabooyinka dhaqangalinta si shaqaalaha loo difaaco.

Waaritaanka iyo La dagaalanka Isbadalka Cimilada

Isbadalka cimiladu waxay isla haddaba saamaynaysaa bulshooyinka San Diego Ismaamulkuna wuxuu si adag uga shaqaynaya in ay wax ka qabato arinka ayadoo adeegsanaysa yaraynta sii daynta neefta hawada wasakhaysa iyo kordhinta waaritaanka.

Wax ka badan $25 milyan ayaa lagu maalgalin doonaa si loo yareeyo sii daynta neefta hawada wasakhaysa ee bulshooyinkeena, oo ay kamid tahay $1 milyan oo lagu taageerayo xarumo gawaarida koronto ahaan looga dabaysto.

Ku dhawaad $60 milyan ayaa lagu kharashgarayn doonaa hormarinada kale ee deegaanka, oo ay kujirto $40 milyan oo wax looga qabanayo biyaha daadadka ah, $16.3 milyan oo lagu bixinayo Barnaamijka Ilaalinta Noocyada Badan (Multiple Species Conservation Program) iyo $3.4 milyan oo lagu hormarinayo Tijuana River Valley.

Dhisidda cagaaran iyo tamarta ilayska qoraxda laga dhaliyo ayaa sare loo qaadi doonaa ayada oo laga dhaafayo kharashka ogolaanshaha oo qiyaastii gaaraya $2.1 milyan. In ka badan 3,500 oo geed ayaa loogu talagalay in ay qabtaan wax ka badan 178,000 bown oo ah curiyaha carbon dioxide sannadkii ayaa lagu talaali doonaa guud ahaan ismaamulka.

Sii daynta hawada wasakhaysan waa la yarayn doonaa — ayadoo helitaanka daryeelka caafimaadka loo siman yahay kor loo qaadi doono — ayada oo loo qoondaynayo $2 milyan si loo soo iibsado laba gaari oo Live Well on Wheels ah iyo shaybaar cusub oo guurguura oo dadweynaha loogu tala galay kaasoo adeegyo siin kara dadka deegaanka badalkii looga baahan lahaa in uu si gaar ah ugu safro xaafiisyada caafimaadka.

Kaalmaynta Qoysaska

Miisaaniyaddaan waxaa sidoo kale kamid ah maalgalin dheeraad ah iyo boosas si diiradda loo saaro baahiyaha maalinlaha ah ee dadka deegaanka marka ay joogaan shaqada iyo guriga, khaasatan kuwa ugu nugul.

Adeegyada Kaalmada ee Guriga lagu bixiyo ee la siiyo dadka waaweyn iyo dadka indhaha la’ ama naafada ah waxaa lagu kordhiyay 60 boos. 100 boos oo cusub oo kale ayaa xoojinaya adeegyada aasaasiga ah waxaa kamid ah CalFresh iyo Medi-Cal, si dadka looga caawiyo in ay helaan cuntada iyo daryeekka caafimaadka ay u baahan yihiin. Adeegyada Daryeelka Caruurta waxay soo kordhin doonaan 100 boos oo cusub si loo kordhiyo kaalmada ka jawaabista xaaladaha degdega ah iyo gaynta caruurta xanaanada ee tayada leh, iyo in la xoojiyo adeegyada kahortagga iyo sii wadidda sare u qaadidda ku xirista qoysaska adeegyada bulshada.

Ku dhawaad $31 milyan oo lagu helay Xeerka Qorshaha Badbaada Maraykanka (America Rescue Plan Act) ee 2021 ayaa lasii wadi doona in lagu taageero **hanaanka shaqada** Guddiga Korjoogeyaasha ee isticmaalka lacagta, ayada oo ay kujiraan adeegyada caafimaadka dhimirka ee loogu tala galay dadka da’ yarta ah iyo kaalmo la siinayo kiraysteyaasha iyo barnaamijyada nafaqada.

Xaafiiska Cusub ee Hormarinta Dhaqaalaha iyo Arimaha Dowladda ee Ismaamulku wuxuu sare u qaadi doonaa koritaanka dhaqaalaha ee loo dhan yahay, wuxuu bixin doonaa fursado ku saabsan farshaxanka iyo dhaqanka, wuxuuna soo saari doonaa barnaamijyo deeq ah kuwaas oo diiradda saaraya ururada aan faa’iido doonka ahayn bulshadana ka socda.

Xaafiiska cusub ee qaabilsan ee Qiimeynta, Howl qabashada iyo Taxliilinta ee Ismaamulkuna, wuxuu isticmaali doonaa xog iyo taxliilino si fikrado wanaagsan looga helo go'aanada saamaynaya bulshooyinkeenna sare loogu qaado adeeg bixinta.

Sare u qaadidda Bulshooyinka iyo Ilaalinta Nabadgalyadooda

Miisaaniyaddu waxay sidoo kale maalgalinaysaa badqabka iyo tayada nolosha.

Waxaa kamid ah $2.9 milyan oo loogu tala galay dhulka goobta mustaqbalka laga dhigayo badqabka bulshada taasoo ku taala Interstate 15 iyo State Route 76, iyo $250,000 oo lagu bilaabayo qorsheyaasha laguna naqshadaynayo dabdamiska cusub ee Jacumba.

Intaa waxaa dheer, Degmada Difaaca Dabka ee Ismaamulka San Diego waxay ku kordhinaysaa $2.2 milyan si loo ilaaliyo bulshada loona yareeyo khatarta dabka kaymaha uu ku leeyahay meelaha aan la daganayn ayada oo la adeegsanayo maaraynta dhirta hareeraha waddada ku taala iyo abuurista hakinta dabka.

Public Health Services waxay kusoo dari doontaa 71 boos oo cusub si loo sii wado xoojinta awooddeeda guud ee difaaca caafimaadka dadka deegaanka.

Miisaaniyaddu waxay $1.4 ku kharashgaryn doontaa beeraha lagu nasto ee Ismaamulka oo cusub iyo kuwo la balaariyay, oo ay kamid yihiin Calavo, Star Ranch, Lindo Lake, Park Circle iyo Waterfront Park. Iyo Hindisaha Helitaanka Cuntada si gacan looga gaysto abuurista beeraha bulshada waxaa lagu maalgalin doonaa $1 milyan.

Ka qaybgalka Bulshada

Bulshada iyo Guddiga Korjoogeyaashu waxay si firfircoon uga raadiyeen bulshada in ay ka qaybgalaan isu keenista miisaaniyadda.

Ismaamulku wuxuu qabtay kulamo fogaan arag ah oo ku saabsan miisaaniyadda kuwaas oo lala qaadanayay mid kasta oo kamid ah Guddiga Korjoogeyaasha shanta degmo; wuxuu sameeyay dhegaysi dadweyne markay ahayd Juun 13 iyo dhegaysi fiidkii Juun 16. Wuxuu sidoo kale abuuray webseedka Qorshe Howleedka wuxuuna dadka siiyay fursad ay si onleen ah faalo uga bixin karaan guud ahaan hanaanka dhegaysiga dadweynaha.